

## **Laanta Caddaaladda iyo Garsoorka Colorado waxay Hagaajineysaa Helitaanka Luuqadda ee Maxkamadaha oo loogu talagalay Shakhsiyaadka leh Aqoonta Ingiriiska oo Xaddidan**

WASHINGTON – Waaxda Caddaaladda ayaa maanta ku dhawaaqday in Garsoorka Colorado uu qaaday tallaabooyin muhiim ah si uu u xaqiijiyo in luqadda si macquul ah loo heli karo oo loogu talagalay dadka leh aqoonta Ingiriiska oo xaddidan (LEP) kuwaas oo la macaamiila nidaamka maxkamadda ee gobolka.

Bishii Luulyo 2023, laanta Xaquuqaha Rayidka ah ee Qaybta ayaa la shaqeysay garsoorka Colorado ka dib markii ay heshay cabashooyin oo ah in maxkamaddaha ay bixinin adeegyada luuqadda loo baahan yahay shakhsiyaada leh LEP sida uu qabo Cinwaanka VI ee Xeerka Xaquuqaha Madaniga ah ee 1964 (Cinwaanka VI). Cinwaan VI wuxuu mamnuucayaa takooridda iyadoo la eegaayo isirka, midibka iyo asalka qaranka oo ay sameeyaan dadka qaata kaalmada dhaqaale ee federaalka.

Iyada oo laga jawaabaayo su'aasha waaxda, Garsoorka Colorado wuxuu garwaaqsaday tallaabooyinka ka hortaga ee horay loo qaaday si wax looga qabto walaacyada laga keenay cabashada waxayna kala shaqeysay waaxda si ay hormarin kala duwan oo kale ugu sameeyso barnaamijka helitaanka luuqadooda.

“Bixinta adeegyada turjubaanka oo saxda ah oo waqtigeeda ku habboon gudaha iyo dibadda ee qolka maxkamadda ayaa ah midda ugu muhiimsan oo lagu xajiinaayo in dhammaan dadka isticmaalayaasha maxkamadda si siman loogu heli karo caddaaladda,” ayaa yiri Kaaliyaha Xeer Illaaliyaha Guud ee Kristen Clarke oo ka tirsan Waaxda Xaquuqaha Madaniga ah ee Qaybta Caddaaladda. “Tallaabooyinka uu qaaday garsoorka Colorado waxay u taagan tahay oo waxay muujineysaa sida ay ugu go’an tahay inay dhab tahay oo lagu dhisaayo barnaamijka helitaanka awoodda luuqadeed.”

Sannadkii gudahiisa tan iyo markii DOJ ay bilowday inay la shaqeeyso Garsoorka Colorado, maxkamadda waxay shaqaaleysiisay iskuduwaha helitaanka luuqadda cusub; dib u eegis lagu sameeyay Xeerka Dhaqaalaha Helitaanka Luuqadda; oo bilaabay inay abuuraan nidaam jadwal cusub oo loogu talagalay turjubaanada; soo iibsaday qalab cusub oo loo isticmaalo turjumaadda maxkamadda oo ay ku jiraan qalabka dhegaha iyo iPads-ka; loo tobararay shaqaalaha maxkamadda iyo turjubaanada; oo la hirgeliyay hormaro kale oo muhiim ah.

Waaxda ayaa sii wadi doontaa inay kormeerto hirgelinta ee isbeddeladaan, waxayna soo dhoweynaysaa xog uruurinta dadweyaha. Cabashooyinka ka imaanaya hab-dhaqamada takoorka ah waxaa lagu soo sheegi karaa bogga intarneetka Qaybta Xaquuqaha Rayidka ah ee [civilrights.justice.gov](http://civilrights.justice.gov)

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Qaybta Xaquuqaha Rayidka waxaad ka heli kartaa boggeeda intarneetka ee [www.justice.gov/crt](http://www.justice.gov/crt). Macluumaadka ku saabsan dadka luuqadda Ingiriiska oo xaddidan iyo Cinwaanka VI waxaad ka heli kartaa [www.lep.gov](http://www.lep.gov), iyo macluumaadka u gaarka ah maxkamadaha waxaad ka heli kartaa [www.lep.gov/state-courts](http://www.lep.gov/state-courts).

---

